Minnesota Pollution Control Agency

Heerarka Is-biirsaday iyo Saamaynnada

Kulanka Bulshada - Juun 29, 2010

Juun 2010

Raad-raaca

Xeerka Minnesota Statute 116.07, qayb-hoosaadka subd. 4a wuxuu fasaxaa in Hay'adda Xakamaynta Wasaqda (MPCA) ay soo saarto ruqsado xagga hawada. Xeerka waxaa dib lo eegay sanadkii 2008.

Hadda, marka ruqsadda loo sameeyo mashruuc ku yaalla meesha uu ka muuqdo midabka cagaarka (eeg sawirka 1), MPCA waa in ay ka baaraandegtaa isla markaana tixgalisaa heerarka is-biirsaday iyo saamaynnada ay ku yeelan karto wasaqaaynta hawada waqtiyadii la soo dhaafay iyo waqtiga xaadirka.

Ulajeedada kulankan waa in lala wadaago hawlaha qoraalka ee lagu socodsiinayo hawlaha heerarka is-biirsaday iyo falanqaynta saamaynnada, sidoo la dhageysto fikradaha jaalliyadda.

Yaa U baahan Ruqsadda Hawada Wasaqda Lagu Siidaynayo?

Rugtu waa in ay heshaa ruqsadda hawada haddii mashruuca la soo jeediyay uu leeyahay suurtagalnimada in uu siidaayo hal ama ka badan ee wasaq hawada marka la eego qiyaasta ku qoran sharciga Minnesota.

Rugtu waa inay muujisaa in ay qancin karto shuruudaha gobolka iyo federaalka inta MPCA aanay soo saarin ruqsadda.

Waa Maxay Heerarka Is-birsaday iyo Falaqaynta Saamaynnada?

Heerarka is-biirsaday iyo falaqaynta saamaynnada waxay ka bilaabataa falanqaynta qatarta lagu saleeyay wasaqda hawada lagu siidaynyo ee mashruuca la soo jediyay. Wasaqda hawada lagu sheegay baaaritaan cabbirka qatarta ee ka bacdi lagu qiimeeyay maclumaadkii horay loo haystay oo ku saabsan wasaqda waqtigiii tagay iyo waqtiga xaadiraka ee gobaha. Falanqayntu waxay adegsataa xogta diyaarka ee jaaliyadda iyo bey'adda si loo dhigo saaymaynnada la soo jeediyay wadajir ahaan goobaha laga yaabo in uu raad ku reebi karo.



Sawirka 1

Sidee Loogu Adeegsaday Falanqaynta Is-biirsaday Go'aannada Ruqsadda Hawada?

MPCA waxay ku saleysaa go'aannadeeda si ay u soo saarto ruqsadda hawada dhowr sababood. Mashruucu waa in uu qanciyaa xeerarka la dabbaqi karo ee gobolka iyo federaalka oo idil. Wixii ku saabsan mashruuca la soo jeediyay oo ku yaalla goobaha hoos ka muuqda, Heerarka Is-biitrsaday iyo falanqaynta saamaynnada waa la iska doonayaa. Sida ku cad shaxda hoos ku qoran (sawirka 2), inta badan mashaariicda waaweyn kaliya waxa la iska doonayaa qiimaynnada halista ama falanqaynta noocyada is-biirsaday.

Goobaha xeerka lagu tilmaamay, waxaa loo baaahanyahay falanqayn dheeraada oo qayb ka ah ruqsadda. Tani macnaheedu waa macluumaad dheeraada oo la caddayn doonaa, dib loo eegi doono loona tixgalindoono qayb ka ahaanshada go'aannada MPCA haddiiba ay noqoto in la soo saaro ruqsadda hawada.

Hawlaha Heerarka Ruqsadda Hawada	Hawlaha Heerarka Ruqsadda Hawada Goobaha Xeerka
Qaabaynta wasaqeeyaha iyo falanqaynta halista • Mashaariicda waaweyn, ama mid kasta goonidiisa	Qaabaynta wasaqeeyaha iyo falanqaynta halista • La iska doonayo waxa ku saabsan go'aamada ruqsadda oo *idil*
Falanqaynta raadadka ay reebi karaan is-biirsiga • Waxa ku saabsan dib-u-eegidda bey'adda, ama kiis walba goonidiisa • Ay ku jiraan kashifaadaha hawada keliya	Falanqaynta raadadka ay reebi karaan iyo heerarka isbiirsiga • Waxa ku saabsan ruqsadaha go'aamada oo *idil* • Ay ku jiraan ilaha wasaqda oo *idil* (warshadaha, socodka gaadiidka, dhinacyada qubashada, iwm) • Ay ku jiraan kashifaadaha *idil* warbaahinta: hawada, biyaha, carrada
Kulamada Wargelinta Bulshada • Haddii la codsado, ama kiis waliba goonidiisa	Kulamada Wargalinta Bulshada • La iska doonayo si loo go'aamiyo soo saarista ruqsadda, waxaa la qaban doonaa kulan labaad ee bulsho inta lagu jiro ogaysiiska caamka ah dhexdiisa

Sidee Bulshadu Uga soo Qaybgali karaan?

MPCA waxay sii wadaysaa in ay cusboonaysiiso heerarka isbiirsiga iyo falanqaynta hawlaha saamaynnada sida hadba loo helo macluumaad cusub oo diyaara. Haddii aad ogtahay ilaha macluumaadka, waxay noqon doonaan kuwo lagu tixgaliyo hawlgalka, fadlan nala soo socodsii. macluumaad dheeraada.

Wixii ku saabsan ruqsadda mashaariic gaara ee ku yaal meelaha xeerku ka hadlayo, kulamada, wargalinta bulshada waxay noqon doonaan kuwo qayb ka ah hawlaha ruqsadda. Kulamo bulsho ayaa la qaban doonaa bilawga mashruuca, marka qalabka oo idil ee codsiga ay soo gaaraan MPCA. Haddii MPCA ay go'aamiso in ay soo saarto ruqsadda, fadhi labaad ayaa la qaban doonaa inta lagu jiro ogaysiiska caamka ah dhexdiisa.

Xiriirka Macluumaadka

Haddii aad su'aalo aad ka qabtid waxa ku saabsan heerarka is-biirsiga iyo saamaynnada ama dhab ahaan warqaddan, fadlan la soo xariir:

- Kristie Ellickson, MPCA
  651-757-2336
  kristie.ellickson@state.mn.us

- Sarah Sevcik, MPCA
  651-757-2715
  sarah.sevcik@state.mn.us